

**Waxaa Qoray: Maxamad Xasanayn Haykal  
Qoraagii Masriga ah ee Caanka ah oo shaaca ka  
qaaday Fadeexooinka Wahhaabiyada**

**Waxaa Turjumay: Dr. Hersi Aw Mohamed  
Sydney, Australia**

**18/07/2005**

**Paragraph 1**

Waxay ahayd maalin waxyaabaha lama filaanka ah ay aad u habboonaayeen, kolkii aan ka gudbay waddalugeedka “Bond Street”ayaan bacleelay looxad-ogaysiiska “South Pay” oo tilmaamaysa xaraash lagu iibinayo khariidado duq ah, oo ay ku jiraan qaar aan doonayay oo ka mid ah khariidadii hore ee Masar (taas oo ah hobiga kaliya ee aan leeyahay xagga wax aruuriska), calaamaddii aan arkay waxay wadatay tilmaan kale oo ku saabsan kutub duq ah, iyo kooxo waraaqo ah (oo qoraal ah) kana yimid bariga dhow mana awoodin in aan iscelsho kolkaas baan galay.

Waxay ahayd meeshii aan aad ugu daahay qolki ay yiilleen qoraalladii waraaqaha ah ee gaarka ah, halkan waxaan ka helay laba waxyaabood:

Midda 1aad oo tiillay tirsiga 206 oo ay ku jiraan 18 warqadood oo lagu qoray gacanta (John Phlipy)<sup>1</sup>, lataliyihii caanka ah ee boqor “Cabdulcasis Aala Sacuud” markiisi horena (John) wuxuu ahaa sarkaal siyaasi ah oo ka tirsanaa xukuumaddii Hindiga<sup>2</sup> kaas oo loo xilsaaray in uu ahaado saldhig isgaarsiineed oo u dhaxeeya xaakimka Riyaad iyo Alixsaa ee Wahhaabiga ah “Cabdulcasiis Aala Sacuud” (inta uusan noqon amiir kadibna suldaan kadibna boqor) - qoraallada siddeedda iyo tobanka ahna lama fidin wali - dhammaantoodna waxay ku qoran yihin gacanta waxayna ku socdaan Sir “Birsy Cooks” kaas oo ah taliyaha guud ee u fadhiya Ingiriiska Aagga Khalijka ee ay arrinkaas u soo xilsaartay dowladda Hindiya wuxuuna saldhiggiisu ah Basra<sup>3</sup> kadibna Baqdaad kadib markii ay soo galeen ciidankii General “Moud” magaaladaas intii uu socday dagaalkii 1aad ee adduunka. Kadibna markii uu noqday cabdulcasiis Suldaanka Najid<sup>4</sup> kadibna Xijaas kadiban uu boqor noqday markii uu mideeyay labada gobol - aya Philpy soo caanbaxay oo noqday lataliye u dhaw boqorka (Cabdulcasiis) oo noqday xiddig ka soo iftay golihisa madaxtooyada<sup>5</sup>.

**Paragraph 2**

Waraaqaha siddeed iyo tobanka ah ee uu u qoray Philpy ninkii madaxa u ah “Sir Birsy Cooks” waxay u dhigmaan akhrinta xaqiiqada dhabta ah. Maxaa yeelay waa calaamado caddaynaya qaybo ka mid ah taariikhda Carabta xagga siyaasadda iyo xagga bani’aadannimada taas oo qiimaheeda tusmo leh. Sababtuna waa in xilka Philpy ee aasaasiga ah uu ah “**In uu ka shaqeeyo sidi looga ciribtiri lahaa**

<sup>1</sup> Ninkan jaasuuska ah wuxuu sheegtay in uu islaamay, wuxuuna isku magacaabay “Cabduallaahi” laakiin kadib aya la ogaaday in uusan muslim ahayn oo uu jaasuus ah, wuxuu ka qoray sacuudiga kitaab uu ku magacaabay Taariikhda Najid iyo Dacwadii Maxamad bin Cabdulwahhaab, laakiin waxaa la yaab leh in uu qirtay in dadkii ay la dagaallamaysay wahhaabiyadu oo ay mushrikiin ku sheegayaan ay dhammaantood muslimiin shanta salaadood tukanaya ahaayeen!

<sup>2</sup> Dowladda Hindiya wuxuu ka wadaa dowladdii Ingiriiska u fadhiday Hindiya ee isticmaarka ahayd ee caddaanku maamulayay.

<sup>3</sup> Basra waa magaalo Ciraaq ku taalla dhinaceeda koofureed ee xigta Kuit.

<sup>4</sup> Najid: waa dhulka saxaraha ah ee Sacuudiga ee Riyaad iyo wixii la xirira ah sida Alixsaa iwm.

<sup>5</sup> Macnaha markii uu Cabdulcasiis boqor noqday oo Xijaas iyo Najid qabsaday aya Philphy ka soo caanbaxay qasriga madaxtooyada ee boqor Cabdulcasiis.

**khilaafadii Cusmaaniga jasiiradda carabta**” taas oo u gogolxaaraysa sidii looga soo horjeesan lahaa (ka soo horjeesadka Khilaafada) iyo sidii loogu jebin lahaa gobalka Shaam<sup>6</sup>, ayada oo la aaminsanaa in taasi keenayso dhicitaankeeda ay Turkiga laftiisa ka dhacayso (waana dhab ahaantii wixii dhacay).

Wuxuuna ahaa xilka koobaad ee Philpy: **In uu hago Cabdulcasii Aala Sacuud si uu u weeraro amiirkha Xaa'il**<sup>7</sup> kaas oo taageersanaa Turkiga si ay u jabto awoodda dowladda Cusmaaniga ee Najid. Iyo in uu u howlgalo sidii uu uga celin lahaa Cabdulcasii bin Sacuud in uu weeraro Haashimiyyinta (Shariif Xuseen iyo Wilashiisa) oo Maka haystay. Maxaa yeelay Haashimiyyinta oo xulafo la ahaa Ingiriiska waxay hoggaamin doonaan towradda carabta ee looga hortegayo Turkiga ayaga oo kaashanaya taageerayaasha iyo xulafada iyo saaxiibada ay Shaam ku leeyihiin si towraddaasi looga horjeedsho khilaafada oo ay ugu celiso saldhiggeeda gudaha ah ee Turkiga dhexdiisa ah.

### **Paragraph 3**

Waxaan taagnaa in nus-saac ku dhaw aniga oo akhrinaya warqadda 1aad maxaa yeelay waa warbixin dhamaystiran oo uu baxshay (Philpy) kadib markii uu ku nagaaday in ka badan saddex bilood xeryihii ciidamada ee xaakimka Riyad iyo Alixsaa’.

Warqaddu waa 32 bog oo taariikhdeedu tahay 2dii July 1918kii lagana soo qoray ((waadiga Dawaasir))<sup>8</sup> Taas oo ku qoran qalin qoray, sadarka ugu horreeyana waa cudurdaar uu ka cudurdaaranayo “In aan qalinqoray ku qoray maxaa yeelay ka ma helin wax kale dalkan aanay wali soo gaarin qalabka xadaaradda cusub” kadibna hadalka ayuu sii wadayaa (Philpy) asiga oo si tifaftiran u sheegaya safarkiisii uu ku aaday xeryaha ciidamada “Ibn Sacuud” iyo mashaakilkii uu kula kulmay waddada, khatartii ku sigtay in uu dhinto, wuxuuna sheegay dagaalladii qabiilooyinka iyo kaaba qabiillada ka dhexsocday, kadibna wuxuu leeyahay: ”**Ibn Sacuud waa nin u baahan saaxiibtinimada Dowladda Ingiriiska iyo taageeradeeda inta uu ka awoodayo sidii uu asiguna u taageeri lahaa ahdaafteeda iyo waxyaabaha ay doonayso, ayada oo la ogyahay in waxa ugu horreeya ee uu u baahanyahay ay yihiin Hub iyo Lacag. Xaqeeqaduna waxay tahay in lacagtluu ay aad muhiim agtiisa uga tahay, maxaa yeelay wuxuu rumaysan yahay in lacagta haddii uu helo oo uu siyo taageerayaashiisa ay taasi saldhig u noqonayso siyaasaddiisa xagga taageerayaashiisa si ay u ogolaadaan si ay ula shaqeeyaan ajaanibta (Ingiriiska ah) ayaga oo ka soo horjeeda MUSLIMIINTA (dowladda khilaafada) arrinkanna waa arrin aad xassaasi u ah”.**

### **Paragraph 4**

Philpy wuxuu intaa ku deray: ”**Haddii Quraanka la raaco ma habboona in uu dagaal ka dhaco akhyaarta muslimiinta - oo Wahhaabiyada ah-** (Sidaa ayuu Yiri Philpy)- Iyo Masiixiyinta dhexdooda, maxaa yeelay waa ahlulkitaab, in ay isa saamaxaanna waa amar xagga Eebbe ka ahaaday.

Laakiin dagaalka MUSLIMIINTA AKHYAARTA ah iyo jihaadkoodu waa in uu ahaado mid ka horjeeda Mushrikiinta iyo Kufaarta, Kufaartana iyo Mushrikiintana waxaa ugu horreeya Turkida Cusmaaniyyinta ah - iyo sidoo kale Asharaafa Haashimiyyinta ah, hadalkii oo kooban waa dhammaan ”**MUSLIMIINTA INTA AAN WAHHAABIVADA AHAYN**”.

<sup>6</sup> Shaam: waa Suuriya, Lubnaan, Falastiin iyo Urdun iyo wixii la xiriira ee ah dhulka Carabtu degto.

<sup>7</sup> Xaa'il: waa gobal goballada Sacuudiga ka mid ah.

<sup>8</sup> Waa tog magaciis.

Intaa wuxuu Philpy ku deray Eray kale oo dhawaq dheer leh, kaas oo ilaa manta dhawaqiisii dhacayo: “**man aha shaqadeennu hadda in aan khaladkaa saxno, taa daaye waxaa inala gudboon in aan xoojino karaahiyada Ibn Sacuud uu u qabo Muslimiinta oo dhan intaan wahhaabiyada ka ahayn. Marka markasta oo uu sii xoogaysto nacaybkaas bulshada uu u qabo, waxaa toosaya maslaxaddeenna**<sup>9</sup>”.

### **Paragraph 5**

Philpy asiga oo hadalkiisii sii wata wuxuu yiri: “**Waxaan ibn Sacuud siiyay shan iyo labaatan kun oo Gani oo dahab ah taas oo aan soo qaaday anigu kolkii aan imaanayay oona ahaa arrin Aad ii xilsaarteen adinku “Sir Birsy Cooks”** **Waxaanna u sheegay in ay tahay qaybtii hore si uu u taakuleeyo duullaankiisa uu ku qaadayo Xaa’il. Ibn Sacuud wuxuu cadsaday oo Aad ugu dadaalay in uu helo lacag dheeraad ah, maxaa yeelay kharashkiisu wuu badanyahay dadka oo dhanna dahab bay ka rabaan.**

### **-----Dhammaad-----**

#### **F.G: Qoraalkan wuxuu sicad shaaca uga qaadayaa arrimaha soo socda:**

1. In Wahhaabiyada uu Ingiriisku aasaasay si uu ugu jebsho khilaafadii turkiga, taas oo caddaynaysa in aanay wahhaabiyadu ahayn koox Islaami ah.
2. In manhajka wahhaabiyada uu dejiyay Ingiriisku, kaas oo ah in ay had iyo jeer ka dhaxayso karaahiyoo joogto ah muslimiinta iyo wahhaabiyada, maxaa yeelay haddii ay heshiyaan muslimiinta iyo wahhaabiyadu sida Philpy sheegay halkaa waxaa ku lumaya maslaxadda Ingiriiska.
3. In wahhaabiyada loo aasaasay sidii loo ciribgoyn lahaa khilaafadii Islaamka, taas oo macnaheedu yahay, in aanay khilaafu Islaami ah imaanay inta ay wahhaabiyoo jirto.
4. In Wahhaabiyadu ay Nasaarada iyo Yahuudda saaxiib la tahay sida uu gooyay Philpy, oo ay isla markaa cadow la yihiin Muslimiinta oo dhan.
5. In Wahaabiyadu u aragto Muslimiinta oo dhan in ay Kufaar Mushrikiin ah yihiin sida uu faray Philpy.

Qodobadaas oo dhammaan si sahlan looga arki karo qoraalka Philpy, waxaa muuqata in aanan wahhaabiyadu beddelikarin oo Ingiriisku sidaa ugu dejiyay istiraatijiyyadaas. Waxaan rejaynayaa in qaarka Ilaahay ku fidneeyay wahhaabiyada ee u malaynaya in ay koox Islaami ah tahay ay ku cibra qaadan doonaan qoraalkan.

Sidoo kale Muslimiintu waa in ay ka digtoonaadaan kooxdaas iyo sharteeda oo la iska ilaalsho maxaa yeelay waa koox dabadhilif ah oo u shaqaysta Maraykanka iyo Ingiriiska.

Waxaan rejaynayaa in aad ka faa’iidaynsan doontaan.

---

<sup>9</sup> Wuxuu ka wadaa haddii nacaybka Ibn Sacuud iyo wahhaabiyadu u hayaan Muslimiinta uu sii xoogsado waxaa meeshaa ku toosaya maslaxadda dowladda Ingiriiska.

# المحل السياسي والاعتدالى محمد حسين هيلك ينصح الوهابية

12

فى مقاله

السبت ٣٠ حزيران - ٢٠٠١ . العدد ٨٩٣٨

**٣** توقفت قرابة نصف ساعة أقرأ الخطاب الأول لأنه تقرير واف كتبه «فيليب» بعد إقامة طالب ثلاثة شهور في معسکر حاكم الرياض والحساء. الخطاب في ٣٤ صفحة - بتاريخ ٢ يونيو ١٩١٨ - من «وادي الدواسر» - مكتوب بالقلم الرصاص، وأول سطر فيه اعتذار عن «أنني كتب بالقلم الرصاص لأنني لم أجده غيره في بلاد لم تصل إليها بعد أدوات المدينة الحديثة». ثم يسطر «فيليب» إلى وصف تفصيلي لرحلته إلى معسکر «ابن سعود»، والمشاكل التي لاقاها في طريقه، والمخاطر التي كانت تودي به، وضمنها صراعات القبائل والمشائخ. ثم يصل إلى القول:

(ابن سعود رجل يحتاج إلى صداقة بريطانيا وتأييدها حتى يستطيع أن يساعد أهدافها ومتطلباتها، مع العلم بأن أول ما يحتاج إليه هو السلاح والمالي. والحقيقة أن المال له عنده اعتبار كبير لإيمانه بأن حصوله عليه وعطاه منه لانتصاره هو المبرر لسياسة إمام هؤلاء الانتصارات يقبلوا العمل مع الآجانب (الإنجليز) ضد المسلمين (دولة الخلافة). وهذه مسألة حساسة جداً.)

**٥** ويستطرد «فيليب»:

قدمت ابن سعود مبلغ الخمسة وعشرين ألف جينيه ذهباً التي حملتها معه بتكليف مكتم (السير «بيرسي كوكس»)، وأفهمته أنها دفعة مقدمة لتمويل حملته ضد «حائل». طلب ابن سعود وائح للحصول على «زيادة» لأن مصاريفه كثيرة، وكان يطلب «الذهب».

**٢** خطابات «فيليب» الشمانية عشر إلى رئيسه السير «بيرسي كوكس» تساوي القراءة على وجه اليقين، فهي لمحات كاشفة لجوانب من التاريخ العربي سياسية وانسانية لها دلائلها. والسبب أن مهمته «فيليب» الأساسية كانت «العمل على تصفيية وجود الخلافة العثمانية في شبه الجزيرة العربية بما يمهد للعمل ضدها ضد الخلافة» وهي ميتمها في منطقة الشام، باعتقاد أن ذلك مoad إلى سقوطها في عَرْدَارِهَا (وهذا حدث فعل).

وكان تكليف «فيليب» الأول هو «توجيه عبد العزيز آل سعود لمهاجمة أمير «حائل»، الموالي للأتراك حتى تكشف القوة العثمانية في «نجد»...

ثم العمل على «منع عبد العزيز آل سعود من مهاجمة الهاشميين (الشريف حسين وبناوه) في «مكة»، لأن هؤلاء الهاشميون الحلفاء لبريطانيا سوف يقودون ثورة العرب ضد الأتراك، معتمدين على ولادات وتحالفات وصداقات لهم في الشام تحمل الثورة ضد الخلافة إلى قرب معقلها الداخلي، في تركيا»)

**٤** يضيف «فيليب» بالنص:

«طبقاً للقرآن فلا ينبغي أن يكون هناك قتال بين أخيار المسلمين - أي الوهابيين (هكذا يقول «فيليب») - وبين المسلمين لأنهم من أهل كتاب، والتسامح معهم توجيه من الله. أما قتال المسلمين الآخيار وجهادهم فلا يمكن إلا مع المشركين والكافر، وأنواع الكفار والمرتكبين من الأتراك العثمانيين - وأيضاً الأشراف الهاشميون - وباختصار كل «الحمدىين فيما عدا الوهابيين»!

. ويضيف «فيليب» عبارة لها دين (ما تزال أصواته سارية حتى الآن):

«ليس من شأننا تصحيح الخطأ في هذا الموضوع، بل على العكس علينا تعزيز كراهية «ابن سعود» لكل المسلمين من غير الوهابيين، فكلما زادت هذه الكراهية للجميع كان ذلك متوفقاً أكثر مع مصالحتنا».

**١** كانت المصادفات مؤقتة ذلك اليوم، فعندما عبرت رصيف «بوند ستريت» لاحظ في لوحة إعلانات «سودبي» إشارة إلى مزاد على خرائط قديمة فيها ما يعني من خرائط قديمة لمصر (وتلك بالذات هوائي الوحيدة في جمع الأشياء). في الإشارة التي لاحظها كانت هناك إضافة أخرى عن كتب قديمة، وعن «مجموعات أوراق» من الشرق الأدنى. ولم استطع أن أقاوم، ودخلت.

كانت وقتي الأطول في قاعة مجموعات الأوراق الخاصة، فهناك وجدت مجموعتين:

١٨ الأولى تحت رقم ٤٠٦ - تحتوي على خطاباً يخط يده «جون فيليب» المستشار الشهير للملك «عبد العزيز آل سعود»، وكان في الأصل ضابطاً سياسياً تابعاً لحكومة الهند تلف بـ يكون «مركز اتصال» بين حاكم الرياض والحساء الوهابي: «عبد العزيز آل سعود» (قبل أن يصبح أميراً، ثم سلطاناً، ثم ملكاً) - والخطابات العثمانية عشر لم تنشر من قبل - وكلها مكتوبة بخط اليد ومحبطة إلى السير «بيرسي كوكس» وهو القائم البريطاني العام في منطقة الخليج مكلفاً بهذه المسؤولية من حكومة الهند وكان مقره في «البصرة» ثم في «بغداد» بعد دخول قوات الجنرال «مود» إليها ضمن وقائع الحرب العالمية الأولى (وفي ما بعد وحين أصبح «عبد العزيز» سلطاناً على «نجد» ثم على «الحجاج»، ثم ملكاً بتوحيد القطرين - ظهر «فيليب» مستشاراً مقررياً من الملك «عبد العزيز»، ونجماً ظاهراً في بلاطه) !!